MAALIYADDA KAALMADA KIRADA MAGAALADA BOSTON

Su'aalaha Badanaa La Weydiiyo Milkiileyaasha Hantida/Maamuleyaasha Hantida

Aniga waxaan ahay milkiilaha/maamulaha hantida oo qaba dagganeyaal ay ku aruurtay bixinta kirada. Maxaan samayn karaa si aan uga qeybgalo Maaliyadda Kaalmada Kirada?

Dagganaha waa in uu soo gudbiyo arjiyada Maaliyadda Kaalmada Kirada (Rental Relief Fund). Hubso in dagganeyaashaada la socdaan brograamkaan kun dhiirigeli in ay soo dalbadaan halkaan. Dagganeyaasha waxay u baahan yahiin macluumaadka lagala xariiro milkiilaha/maamulaha hantida si ay u helaan arjiga iyo koobi saxiixan oo ah heshiika kirada ama dagganaashada ee iminka jira. Fadlan hubso in dagganeyaashaada heli karaan macluumaadkaas. Waxaad kaloo taageeri kartaa hawsha arjiga marka aad keentid waxyaabaha soo socdo soona raacisid arjiga dagganahaada:

- W9 (La buuxiyay, lagu qoray taariikhda kaddibna milkiilaha hantida saxiixay)
- Caddeynta milkiyadda (warqadaha la ogol yahay waxaa ka mid ah: Biilka canshuurta, heshiiska, deynta hantida, biilka ceymiska hantida kirada, ama warqadaha lagala xariiro internetka)
- Warqadda ogolaashada maalgelinta oo saxiixan

Bacdamaa aan ahay milkiilaha/maamulaha hantida, maxaa leyga baahan yahay in aan soo gudbiyo?

Milkiileyaasha/Maamuleyaasha hantida waa in ay keenaan caddeynta milkiyadda, ama heshiiska kirada ama heshiiska dagganaha, W-9, iyo warqadda ogolaashada maalgelinta oo saxiixan (fiiri liiska buuxa ee kor ku yaal) ka hor inta aan la bixinin kaalmada kirada. Milkiilaha hantida wuxuu dalban karaa Nambarka Aqoonsiga Loo-Shaqeeyaha haddii aysan mid ku haysanin halkaan. Milkiileyaasha hantida waxaa la weydiin doonaa in ay keenaan macluumaadkaan kaddib marka la xaqiijiyo xaq u yeelashada dagganaha.

Maxay tahay sababta aad u baahan tahay macluumaadkaan?

Wakaaladaha aan fa'iidada raadinin ee maamula Maaliyadda Kaalmada Kirada waxay u baahan yahiin warqadaha la soo codsaday si loo soo saaro lacagaha kaalmada kirada. Lama bixin karo kaalmada kirada haddii aan la keenin warqaddaan.

Yaa lala qeybsan doonaa macluumaadkaan?

Macluumaadkaan waxaa lala qeybsan doonaa ururka aan fa'iidada raadinin ee soo saara bixinta kharashka kaalmada kirada.

Ma ley siin doonaa 1099?

Haa, IRS waxay rabtaa in la soo saaro 1099 xagga bixinta lacagaha kaalmada kirada.

Waxaan haystaa dagganeyaal oo horay kaalmo uga helay Maaliyadda Kaalmada Kirada. Ma u baahan yahiin in ay dib u dalbadaan?

Haa. Tani waa brograam cusub oo laga helo maalgelin cusub, dagganeyaasha waxay u baahan yahiin arji cusub.

Maxaa loo isticmaali doonaa maalgelintaan/kaalmadaan?

Maaliyadda Kaalmada Kirada Magaalada Boston (City Of Boston's Rental Relief Fund) waxay kireesteyaasha ku kaalmeyn karaan kharashka soo socda:

- Kharashka kirada la soo dhaafay (laga bilaabo Maarso 13, 2020), kharashka iminka socda, iyo ilaa saddax bil kharashka kirada la filaayo
- Kharashka la soo dhaafay (laga bilaabo Maarso 13, 2020), kharashka iminka socda, ama ilaa saddax bil danabka la filaayo (kana mid ah internetka) iyo kharashka quwadda guriga (oo ah gunnada danabka)
- Kharashka ku baxa guuritaanka Magaalada Boston

Maalgelinta looma isticmaali karo waxa soo socda:

- Lacagaha kirada aruuray ama biilasha danabka laga soo qaatay intii ka horeysay Maarso 13, 2020
- Lacagaha la siiyo guryaha lagu noolaan karo
- Lacagaha la siiyo milkiileyaasha hantida ee qaraabada la ah xubnaha qoyska (haddii qaraabada aysan ahayn shirkad u shaqeyso sida LLC)

Intee ayay qaadan doontaa si loo soo daayo lacag bixintaan?

Lacagaha la bixiyo waxaa lagu soo diri doonaa jeeg ama waxaa toos loogu shubi doonaa milkiilaha hantida iyo/ama bixiyeyaasha danabka. Lacagta waa in ay ku timaado muddo 7-10 maalin gudahooda kaddib marka la ogeysiiyo arjiga la ogolaaday.

Maxaa loola jeedaa labolaabidda manaafacaadka

Maaliyadda Kaalmada Kirada looma isticmaali karo in lagu bixiyo kaalmada kirada iyo/ama danabka ay horay u bixiyeen ilaha kale maaliyadda. Haddii aad horay u dalbatay ama aad qorsheysatay in aad kaalmo ka dalbatid ilo kale, codsigaada kaalmada kirada aad ka heshid maaliyaddaan waa in ay bixiyaan bilo kala duwan adeegga. Tusaale ahaan, haddii aad horay u heshay/dalbatay kaalmada kirada laga helo ilo kale bisha Maarso iyo Abriil, codsigaada maaliyaddaan kuma jiri karaan bilahaas.

Lacagta kaalmada kirada ma lagu bixin karaa khidmadaha marka lala soo daaho ama khidmadaha kale?

Waxaan ku dhiirigelineynaa milkiileyaasha hantida ee ka qeybgala Maaliyadda Kaalmada Kirada in aysan soo dallicin khidmadaha daahidda bacdamaa ay qaataan kaalmo. Dhiirigelintaan in laga dhaafo khidmadaha lala soo daaho waxay kaalmeyn doontaa in maaliyadda lagu kaalmeeyo dagganeyaal badan.

Maxay yahiin qodobada brograamka ee looga baahan yahay milkiileyaasha in ay waafaqaan?

Maamuleyaasha hantida waa in ay waafaqaan:

- In ay dib u soo celiyaan dagganaashada ka-qeybgalaha
- In aan lagu dhaqaaqin in guriga laga saaro muddada ay socoto kaalmadaan
- La joojiyo kiiska ka-saaridda haddii kaalmadaan bixiso kirada ku aruurtay dagganaha.
- In ay ogeysiiyaan OHS haddii ay jiraan waxyaabo iska baddala dagganaashada ka-qeybgalaha
- Laga qeybgalo kullamada dhexdhexaadinta kharash la'aanta ee lala galo dhexdhexaadiyeyaasha OHS haddii ay soo baxaan arrimo la xariira dagganaashada ka-qeybgalaha

Aniga waxaan ahay milkiile hanti yar oo weli dhibaato kala kulma bixinta deynta dhismaha guriga aan leeyahay. Maxaa yahiin ilaha ay heli karaan milkiileyaasha hantida ku sugan xaaladaan?

Maaliyadda Kaalmada Boston ee Magaalada Boston kaddib, waxaa jira ilaha gobolka sida Kaalmada Guryaha ee loogu Talogalay Qoysaska Kala Guurka (Residential Assistance for Families in Transition (RAFT) iyo Degdegga Kirada iyo Kaalmada Deynta (Emergency Rent & Mortgage Assistance) (ERMA) oo laga yaabo in ay la kulmaan baahidaada (macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan labada brograam waxaa laga heli karaa halkaan).

Dagganeyaasheyda waxay awood u yeesheen in ay bixiyaan qeyb ka tirsan kirada ama in ay bixiyaan kirada oo idil balse waxay dhibaato kala kulmi doonaan in ay bixiyaan kirada marka horay loo sii socdo. Maxay yahiin ilaha kale ay heli karaan iyaga?

Waxaan ku dhiiri gelineynaa dagganeyaasha iyo milkiileyaasha hantida in ay dalbadaan ilaha ku qoran kor. Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability) waxaa kaloo laga helaa qorshaha la-tallinta milkiilaha hantida si loogu kaalmeeyo milkiileyaasha hantida Boston ilaa sagaal guri ama ka yar una helaan habab u dhaqaaleeya waqtiga iyo kharashka si loo xajisto dagganeyaasha dajiyaan milkiyadda, mar kasta ay suurtogal ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan brograamkaan waxaa laga heli karaa halkaan.